# Shaqeeya? Xanuunsan? Shaqo raadinaya? Hawlgab?

**Iyadoon la eegeynin waxa aad sameysid – waa laguu baahanyahay si suuqa shaqada ee Swiidhan loo tilmaan looga bixiyo**

**Uma baahnid in aad sugtid!**

Ku soo dhawaw in aad Evry ka soo wacdid 0200-11 20 11 ama e-mail u soo dir support.scb@evry.com si aad waqti wareysi u ballansatid.

**Wareysiga ballan ugu dhigo luqado kale ama luqadda dhagoolayaasha**
0200-11 20 11
support.scb@evry.com

**Su'aalo ku aaddan AKU**
010-479 42 60
aku@scb.se

**Natiijo & macluumaad**
www.scb.se/aku

Waa lagu salaamay! Annaga joogna SCB waxaannu dooneynaa in aannu kugu casuunno in aad ka qeyb qaadatid Baaritaannada suuqa shaqada, AKU.

Ku dhawaad 2 usbuuc ka dib waxaa ku soo wici doona qof wareyste ah oo Evry ka socda si uu xaalkaaga suuqa shaqada wax kaaga weydiiyo –haddii aad shaqeysid, aad shaqo doon tahay, aad hawlgab tahay, aad wax baratid ama aad wax aad kale sameysid. Wareysigu wuxuu caadi ahaan qaadanayaa 5-10 daqiiqo. Haddii aad dooneysid waxaa laguugu soo dhaweynayaa in aad waqti kugu habboon ballan ku dhigatid khadka taleefanka ama e-mail.

**Cid kale laguuguma beddeli karo**
Ku nasiisbsasho ayaa keentay in adiga, adiga ah, lagu doortay. Dabcan in laga qeyb qaato waa wax iskaa iyo haddii aad doontid ah, laakiinse waxaan rejeyneynaa in aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid maxaa yeelay AKU waa baaritaan muhiim ah. Wuxuu dadka siinayaa macluumaad rasmi ah oo tusaale ahaan ku aaddan shaqo la'aanta iyo waqtiyada shaqada, wuxuuna aasaas u yahay go'aaman siyaasadeed oo ku saameynaya adiga iyo dhammaan dadka Swiidhan deggan.

**Ma qabtaa su'aalo?**
Wax ma iska weydiineysaa baaritaanka ama ka qeyb qaadashadu sida ay u dhaceyso? Nala soo xiriir si aannu kuu cawinno markaa.

Hormaris ahaan aad baad ugu mahadsantahay ka qeyb qaadashadaada!
Salaan saaxibtinimo

*Magnus Sjöström*
*Madaxa baaritaannada xoogga shaqada SCB*

*Elisabet Andersson*
*Kaaliyaha madaxa SCB*

**SCB Wuxuu ka warramaa Swiidhan**
Hey'adda tirakoobka SCB waxay bulshada siisaa tirakoob si ga'aanno loo gaaro, dood loo yeesho, cilmi baarisna loo sameeya. Waxaan taas u sameyneynaa iyadoo ay xikuumadda, hey'adaha dowladda, cilmi baarayaasha iyo laamaha wax soo saarku ay noo xil saareen. Tira koobkeennu wuxuu ka qeyb qaataa in la helo dood macluumaad rasmi ah ku saleysan iyo qaraarro aasaas aad u fiican leh

**Yaa ka dambeeya baaritaannada?**

SCB wuxuu AKU ku sameeyaa go'aan baarlamaanka iyo xukuumadda ka soo baxay. Wuxuu qeyb ka yahay tirakoobyada rasmiga ah ee Swiidhan oo macnaha looma sameeyo iyadoo ula jeeddo ganacsi laga leeyahay. Qaar wareysiyadaas ka mid ah oo baaritaannada loogu baahanyahay waxaa SCB u sameyneysa shirkadda EVRY ee macluumaad ururinta.

**Yaa isticmaalaya jawaabaha, sideese loo isticmaalyaa?**

Marka aannu jawaabaha ururinno waannu isu gee-geyneynaa si ay u noqdaan tira koob qaabkiisu yahay shax iyo jaantus. Tira koobka waxaa isticmaalaya baarlamaanka iyo xukuumadda, xisbiyada siyaasadda, wargeysyada, TV-ga iyo raadiyaha, shirkadaha, ururrada shaqaalaha cilmi baarayaasha iyo ardayda iyo dadweynaha guud ahaaneed. Tira koobka lagama arki karo waxa adiga, adiga ah, ama cid kale ay ku jawaabtay.

SCB mararka qaarkood xog iyo macluumaad kale wuu u gudbin karyaa cilmi baarayaal iyo cid kale oo tira koob soo saareysa. Cilmi baarista iyo hawlaha tira koobka ee macluumaadka SCB lagu isticmaalayo waxaa khuseeya xeerka sir qarinta ee tira koobka, iyadoon la eegeyn haddii ay taasi ka ag dhaceyso SCB ama cid kale agteeda. SCB aad buu ugu gacan adagyahay in uu macluumaad cid kale u dhiibo.

**Horay wax macluumaad ah oo igu saabsan ma soo qaadaneysaan?**

Haa, si aadan ugu baahan in aad ka jawaabtid waxyaabo horbaba u diiwaan gashan SCB, waxaannu soo qaadanayaa macluumaadka ku aaddan cinwaanka, waddanka dhalasaha, sanadka soo galootinimada haddii laga yaabo in uu jiro, waxbarashada, magaca goobta shaqada, cinwaanka iyo faraca, iyo dakhliga (haddii ay macluumaadku jiraan).

**Intee lagu faafinayaa natiijada?**

Tira koobka waxaa bil walba lagu faafinayaa barta intarneetka ee SCB:ga, www.scb.se/aku. Natiijada waxaa caadi ahaan sidoo kale lagu faafiyaa warbaahinta, warbixinnada iyo is barbar dhigyo caalami ah oo kala duduwan. Tirada rasmiga ah ee shaqo la'aanta ee laga sheego TV-ga, wargeysyada iyo raadiyuhu waxay ka timaadaa baaritaankan.

**Maxaan uga qeyb qaadanayaa?**

In aad ka qeyb qaadatid waxaad gacan uga geysaneysaa in tilmaan laga bixiyo sida uu dhab ahaan suuqa shaqada ee swiidhishku u muuqdo. Bil walba waxaannu wacnaa 29 500 oo qof. Qof kasta oo la wareysto wuxuu u dhigmaa 300 oo qof oo shacabka ah!

**Ma shaqeeyo – saas oo ay tahay ma ka qeyb qaadanayaa?**

Haa, dadka oo dhan xaaladdoodu, iyadoon la eegeyn in uu qofku shaqeeyo iyo in kale, waa muhiim si sida ugu saxsan ee suurta ah tilmaan looga bixin karo suuqa shaqada. Haddii aannu wareysan lahayn dadka shaqeeya oo keliya, wuxuu sawirka suuqa shaqada laga qabo noqon lahaa med qalloocan.

**Maahi muwaadin swiidhish ah – saas oo ay tahay ma ka qeyb qaadanayaa?**

Haa, tira koobku waa in uu sawir ka bixiyaa dhammaan dadka Swiidhan deggan, iyagoon muwaadinnimo la eegeyn.

**Ma khasab baa in aan ka jawaabo su'aalaha oo dhan?**

Maya, waa ookey in uu qofku ka boodo su'aalaha uusan dooneyn in uu ka jawaabo. Su'aalaha qaarkood sida tusaale ahaan in uu qofku shaqeeyo iyo in kale, waa in laga jawaabaa si wareysiga loogu xisaabtami karo, laakiin waxaasi waa wax uu wareystuhu qofka ogeysiin doonyo.

**Jawaabaheyga dhab ahaan ma la ilaalinayaa?**

Haa. Jawaabaha aad wareysiga ku bixineysid waxaa ilaalinaya xeerka sir heynta, dhammaan kuwa ka shaqeeya baaritaanka waxaa saaran waajibka xog xafididda. Sir heyntu waxay u shaqeyneysaa si waafaqsan fasalka 24, qodobka 8 ee xeerka sir heynta- iyo waxyaabaha guud (2009:400). Xeerarka ku aaddan maareynta macluumaadka shakhsiga ahi waxay ku jiraan xeerka Midowg Yurub ee ilaalinta macluumaadka iyo xeerka (2001:99) iyo qaraarrada (2001:100) ee ku aaddan tira koobka rasmiga ah. Waxaa intaas dheer in ay xitaa jiraan xeerar ku jira sharciga (2018:000) ee ku aaddan go'aamanka dhameystirka ah ee xeerka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub iyo qaraarrada leysugu wargeliyay si la xiriirta xeerkan.

SCB isagoo heshiis adeegsanay wuxuu ku waajibiyay shaqaalaha EVRY ee baaritaanka ka shaqeynay in ay lahaadaan sir qarin u dhiganta. Nanmbarka warqadda cinwaankeeda kore ku dul yaalla waxaa loogu tala galay in aad aqoonsi isaga bixisid haddii aad SCB ama EVRY la soo xiriirid.

Xaq ayaad u leedahay in aad si lacag la'aan ah koobi uga heshid, waxa loogu yeero wax laga soo saaray diiwaanka, macluumaadka uu SCB maareynayo isagoo metelaya cidda macluumaadka shakhsiga ah mas'uulka ka ah. Haddii dalabka lagu soo gudbiyo si elekteroonig ah, waxaad xaq u leedahay in aad waxa la soo saaray ku heshid si elekteroonig ah. Haddii aad u aragtid in SCB ay macluumaadkaaga u maareysay si ka hor imaaneysa xeerka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub waxaad haddii shuruuda go'an la helo xaq u leedahay in macluumaadka la tiritiro. Xasuusnaw in aad sheegtid nambarradaada aqoonsiga marka aad dalbaneysid waxa diiwaanka laga soo saaray.

**Goormeed isoo waceysaan?**

Waxaan ku soo waceynaa ku dhawaad 2 usbuuc ka bacdi marka ay warqaddani ku soo gaarto. Qeyb muhiim ah oo tira koobka ka mid ah waa isbeddellada xagga suuqa shaqada – tusaale ahaan imisa jeer ayey dadku shaqada beddeshaan iyo ilaa intee uu qofku shaqo la'aan ahaadaa. Sidaas darteed ayaannu cid walba wareysan doonna hal mar in ka badan, guud ahaan siddeed jeer oo ay seddax-seddax bil u kala dhexeyso. Wareysiyada qaarkood waxay wareystayaashu soo jeedin karaan su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan suuqa shaqada, tusaale ahaan bey'ada shaqada.

**Su'aalo badan iyo jawaabo waxay ku jiraan:**

www.scb.se/aku-info

Waxaa xitaa jirta warqad hordhac ah oo luqado fara badan
ku qoran.